

Macluumaadka Loo Baahan Yahay si Loo Xareeysto Macaashka Shaqo-la'aanta ee Gobolka Maine

Tilmaamaha muuqaalka ah ee tallaabo kasta waxaa laga heli karaa YouTube (Kaliya Ingiriisi)

Hagaajisada Koontadaada ReEmployME: <https://www.youtube.com/watch?v=7ySVbKf9vi8>

Xereynta Qaansheegashadaada Koowaad: <https://www.youtube.com/watch?v=uW0qIXfU9IQ>

Xareynta Qaansheegashadaada Isbuuclaha ah: <https://www.youtube.com/watch?v=tu0M9w-gWS4>

Haddii aadan laheyn iimayl, ka sameyso cinwaan iimayl gudaha Gmail (ama Yahoo, Outlook).

Si aad uga hagaajisato cinwaan cusub ReEmployME, booqo www.maine.gov/reemployme oo sameyso:

Magaca Gelida: _____

Furaha: _____


MUHIIM! Xaqiiji iimaylkaaga kadib markaad cinwaankaaga sameysato:

1. Cinwaankaaga adoo ku jira, u gudub Benefits Maintenance (Taageerada Macaashka) > Update Claimant Profile (Cusbooneysii Haybta Qaansheegtaha) > Verify E-mail (Xaqiiji Iimaylka);
2. Shaashada xigta geli Baaqaaga Xaqiijinta ee laguugu soo diray iimaylkaaga diiwaanka ku jira si aad u xaqiijiso iimaylkaaga ama guji erayga 'here' si laguugu soo saaro baaq cusub oo lagu diro iimaylka diiwaanka ku jiro. (Haddii aad u baahan tahay baaq kale, guji 'here' (halkan). Iimayl ayaa laguugu soo diri doonnaa oo wata baaq xaqiijin oo cusub.)
3. Haddii baaq xaqiijin oo cusub laguugu soo diro, dib ugu noqo tallaabada 2 oo ku taala isla shaashadda oo geli baaqa si aad u dhammayso hawsha dardargelinta.

Si aad u codsato macaashka shaqo-la'aanta, waxaa lagaaga baahan yahay inaad bixiso waxyaabaha soo socda:

1. Magaca Sharciga (Magaca koowaad, magaca dhexe, Magaca Dambe)
2. Cinwaankaaga Boostada ee Haatan
3. Lambarkaaga Telefoonka
4. Iimaylka
5. Jinsiga (Lab/Dhedig)
6. Taariikhda Dhalashada (bisha, maalinta, sanadka)
7. Lambarka Sugnaanta Bulshada (SSN)
8. Haddii aadan AHAYN Muwaadin Amerikan ah, waa inaad haysataa:
 - a. Xaalad Degganaansho oo Sharciyeysan (heystaha "Green Card" (Kaarka Cagaaran));
 - b. Dukumentiga Oggolaanshaha Shaqada ee Mareykanka ("Work Permit" (Shatiga Shaqada / Rukhsad Shaqo)); ama

c. Diiwaanka Immanshaha/Ka-bixida ee dhigaya “employment authorized” (shaqo oggolaanshaha)



(“I-94 Card” (Kaarka I-94)).

Lambarka Qalaad

- Haddii aad haysato kaarka cagaaran, ama rukhsad shaqo, ku qor lambarkaaga Qalaad/USCIS codsiga onlaynka ah kaga qoran tahay “Alien Number” (Lambarka Qalaad).
- Haddii aad haysato kaarka “employment authorized”(shaqo oggolaanshaha) I-94, fadlan ku qor lambarka kaarkaaga I-94 ee 11 god ah halka codsiga onlaynka ah kaga qoran tahay “Alien Number” (Lambarka Qalaad).

Taariikhda Dhicitaanka Dokumentiga

Fadlan qor taariikhda dukumentigaaga sare dhici doono.

FIIRO GAAR AH: Hadduu dukumentigaaga uusan LAHEYN taariikh dhicitaan, fadlan qor taariikh hal sano ah laga soo bilaabo taariikhda aad xareysay codsigaaga.

- **Tusaale:** Waxaad xareysay codsi macaash markay ahayd 4/1/2020. Dhicitaanka waa inuu noqdaa: 01/04/2021.

U-qalmitaanka

- Waa in sharci ahaan lagu oggolaay inaad ka shaqeyso gudaha Mareykanka markii aad kasbanaysay Muddada Mushaharkaaga Halbeegga.
- Waa in sharci ahaan lagu oggol yahay inaad shaqeyso markaad sheeganayso macaashka shaqo-la'aanta.
- Lambarkaaga Sugnaanta Bulshada iyo/ama Lambarkaaga Qalaad waxaa laga xaqiijin doonnaa keyd-xogeedyada dawladda, sidaa darteed hubi inaad geliso macluumaadka dhammeystiran ee u dhigma dukumentiyadaan.

Macluumaadka Looga Baahan Yahay Xaasaska iyo Ku-tiirsan-aha/-eyaasha (carruurta)

- Magaca Sharciiga (Magaca koowaad, magaca dhexe, Magaca dambe) ee Xaaska/Ilmaha
- Lambarka Sugnaanta Bulshada
- Xiriirka
- Taariikhda Dhalashada

Macluumaadka Ku Saabsan Loo-shaqeeyaha/Taariikhda Shaqada

Waa inaad sheegtaa DHAMMAAN loo-shaqeeyayaashaada 18-kii bilood ee ugu dambeeyay haddii aad lahayd hal shaqo ama batrooni

1. Magaca loo-shaqeey-aha(-eyaasha) (bixi magaca dhammeystiran ee shirkadda)
2. Cinwaanka loo-shaqeey-aha(-eyaasha) (bixi cinwaanka boostada ee shirkada oo wata baaqa cinwaanka)
 - a. Lambarka Telefoonka Loo-shaqeey-aha(-eyaasha)
 - b. Magaca Kormeeraha (*lama codsan, balse wuxuu noqon karaa mid waxtar leh haddii aad qabto wax su'aalo ah*)
3. Lambarka Lagala Xiriiro ama limaylka Kormeeraha (*lama codsan, balse wuxuu noqon karaa mid waxtar leh haddii aad qabto wax su'aalo ah*)

Mudo intee le'eg ayaad halkaas ka shaqeysay oo goorma ayaad bilawday?

1. Taariikhihii ugu dambeeyay ee shaqada/goorta aad shaqeysay
 - a. Goorma ayaad bilawday shaqadan? Bisha, maalinta, sanadka
 - b. Goorma ayaad joojisay inaad ka shaqeyso shaqadan (lagaa joojiyay shaqada)? Bisha, maalinta, sanadka
2. Tirada saacadaha ee isbuuc kasta aad ka shaqeyso shaqadan? Wakhti buuxa/dhiman?

Immisa ayaa lagu siiyay?

1. Mushaarka lagu siiyay saacad kasta? Mushaarka saacadlaha?
2. Mushaarka guud ee lagu siiyay isbuuc kasta (wadarta kahor canshuurta)
3. Mushaarka saafiga ah ee lagu siiyay isbuuc kasta (inta aad dhab ahaantii hesho). (Ka fiiri gummadka jeeggaga ama lacag-bixinta si aad u xaqiijiso)
4. **Mushaarka guud: soo sheeg caddada guud ee dakhligaaga isbuuc kasta aad shaqeyso markaad xareynayso qaansheegashadaada, iyo sidoo kale ku guuldareysiga inaad soo sheegto gunnadaada (mushaarka shago ka fariisinta, mushaarka fasaxa, mushaarka nasashada, gunnada), waxay sababi kartaa go'aamin khayaano.**

Sidee jeclaan laheyd in lacagta lagugu siiyo?

Waxaa lagu weydiin doonaa qaabka lacag-bixinta aad doorbideyso: dabaajiga tooska ah ee koontadaada jeegga ama keydsashada ee bangigaaga ama Kaarka Lacag-bixinta Elektarooniga (EPC). Kani waa Visa Debit Card (Kaar-deymeeke Visa) laga helo Bangi Mareykan ah.

Haddii aad dooneysid in lagugu siiyo dabaaji toos ah ee bangiga, waxaa lagaaga baahan yahay:

- Magaca Qofka ku Qoran Koontada Bangiga
- Magaca bangiga
- Cinwaanka bangiga
- Lambarka telefoonka ee bangiga
- Koontada Jeegga ama Keydsashada
- Lambarka Koontada
- “Lambarka hubinta” bangiga (waxaa laga heli karaa jeeggaga)

Haddii aad rabto in lagu siiyo iyadoo la adeegsanayo Kaarka Lacag-bixinta Elektarooniga ah (Visa debit) waxaa lagu soo diri doonaa kaar visa ah. Tilmaamaha isticmaalka kaarka waxaa lala bixiyaa kaarka. Booqo www.maine.gov/reemploye oo guji Payment Options (Ikhtiyaaraadka Lacag-bixinta) ee hoos yimaada qeybta “Learn About” (Ogow Wax Ku Saabsan) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Tixgelinnada Canshuuraha

Waxaa lagu weydiin doonaa inaad jeceshahay inaad dhigaaliso canshuuraha inta lagu jiro codsigaaga bilawga

ah ee macaashka (waxaan ku talinaynaa inaad dhigaaliso canshuuraha haddii aad awooddo, markaa uma baahnid inaad cashuuraha ka bixisid goor dambe lacag-bixinnada shaqo-la'aanta aad hesho). 10% loo dhigaaliyay canshuur Dawladeed? 5% loo dhigaaliyay canshuur goboleed?

- Haddii aad imminka hesho Caymiska Sugnaanta Bulshada (SSI) ama aad hesho gargaarka dawladeed ee ilmahaaga (TANF), waxaad **laga yaabaa** in lagaa dhaafo dhigaalinta tooska ah.

Mar haddii aad xareysid, waxaad heli doontaa lambar xaqiijin iyo iimayl xaqiijin marka qaansheegashadaada la aqbalo. Haddii aadan helin lambar xaqiijin, ma aadan dhammeystirin hawsha xareynta.

Waa INAAD xareysaa isbuuc kasta xaqiijin ah inaad rabto in aad sheegato macaashka shaqo-la'aanta. Tani waxaad samayn kartaa adoo adeegsanaya koontadaada 'ReEmployME' ee onlaynka ah, ama telefoon.

DHIGAALADA

SIBL ee Shaqo-la'aanta

<https://www.maine.gov/labor/docs/2020/covid19/covidfaqandui.pdf>

Mareegta Shaqo-la'aanta ee MDOL: <https://www.maine.gov/unemployment/>

Macluumaadka Shaqo-la'aanta ee COVID-19: <https://www.maine.gov/labor/covid19/>

Xareynta Qaansheegashada ee onlaynka ah: www.maine.gov/reemployme

Saacadaha Shaqada ee Adeegyada Macaashka: Isniinta – Jimcaha, 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo.

Saacadaha Adeegga Macmiilka: Isniinta – Jimcaha, 8:00 subaxnimo ilaa 12:30 duhurnimo.

Telefoonka Adeegga Macmiilka: 1-800-593-7660

Adeegga Macmiilka Onlaynka ah: www.maine.gov/labor/contact (dooro badhanka shaqo-la'aanta)

Ka hel Xarun Xirfadeed/Wada-sheekeysii Toos ah:

<https://www.mainecareercenter.gov/locations/index.shtml>